

Macluumaad iyo tilmaamo loogu talagalay qofka dhex joogay waxqabad halkaas oo lagu xaqiijiyey iyo kiis covid-19 ahi jiro

Maxaan macluumaadkan ugu helayaa?

Iyadoo xiriir la leh waxqabadka ayuu kiis la xaqiijiyey oo covid-19 ah jiraa. Raad gurida infegshanka ayaa socota iyadoo baaxada raad gurka infegshanka intay leegtahay uu go'aaminaayo qofka raad gurka infegshan sameynayaa. Adiga laguuma aqoonsan inaad tahay qof xiriir dhow la leh kaas oo la qiimeynaayo inuu infegshanku toos kuu soo gaarey. Dhamaan dadka waxqabadka jooga ayaa lagu guubaabinayaa inay aad uga fiirsadaan/foojinaadaan imaatinka xitaa calaamadaha khafiifka ah. Qof calaamado leh ayaa loo soo jeedinaa inuu tijaabo iska qaado.

Maxaan hadda sameeyaa?

Waa inaad siidii hore ugu sii wadato inaad raacdo talooyinka guud ee jira, sida in la yeesho nadaafada gacmaha oo wanaagsan iyo in masaafad dadka loo jirsado halka ay taasi suurtoagal tahay. Haddii aad calaamado yeelato, xitaa qaar khafiif ah, isla markiiba guriga aad oo guriga joog. Iska qaad tijaabo covid-19 ah oo jawaabta sug ka hor intaanad waxqabadka ku laaban. Ogsoonow haddii baaritaanka uu muujinayo inaanad covid-19 qabin ayaad weli dib ugu xanuunsan kartaa.

Sidee ayaan sameeyaa si aan tijaabo iskaga qaado?

Waxaad tijaabo iska qaadista ka dalban kartaa 1177.se. Tijaabada PCR-ku waxay muujineysaa haddii aad fayrus ku leedahay hawo mareenkaaga. Tijaabadu kharash kuguma taagna waxaana lagu qaadaaya guriga. Markaad waalid/masuul tahay ayaad adigu tijaabada u dalbanaysaa carruurta. Haddii ilmuhu uu 13 sano jir gaadho ayay iyadu ama isagu u baahan yahay inuu BankID ama Freja eID Plus lahaado si uu ugu dalbadaan tijaabo iska qaadista.

Haddii ilmuhu aanu aqoonsi elektaroonig ah haysan, ayaad wici kartaa rugta caafimaadka kuwaas oo qiimeyn ku sameyn doona haddii taas bedelkeeda halkaas tijaabo lagaga qaado. Waxaad 1177.se ka helaysaa macluumaad la soo ururiyey oo ku saabsan tijaabo qaadista.

Sameyso BankID ama Freja eID Plus

Si BankID loogu sameysto ayaa loo baahan yahay oggolaanshaha waalidka/masuulka laga helo, xeerarku waxay kala duwan yihiin bangiyada kala duwan. Xadka da'da lagu qaadanaayo ayaa kala duwan laakiin waxay bangiyada badankoodu carruurta BankID siiyaan markay 13 sano jir gaaraan laakiin ma aha kuligood.

SäkerhetsID ga moobalyka iyo aqoonsiga elektarooniga ah ee u dhigma ayaan loo isticmaali karin si loogu soo gallo 1177.se.

Freja eID Plus waa aqoonsi elektarooniga ah oo Iswiidhish ah, bilaash ah, oo moobaylka ahaan ah. Waxaad ka sameysnaysaa adigoo:

- App kula soo degaaya moobalkaaga ama tablet-kaaga.
- Booqo mid ka mid ah wakiilada ATG ee ku xiran si aad uga shaqeysiiso/hawlgeliso aqoonsiga elektarooniga oo heerka plus-ka gaarsiisen.
- Waa inaan ogolaansho ka haysato masuulka/daryeelaha si aad ugu sameysato Freja eID Plus haddii aad 18 sano jir ka yar tahey.

Taasi ma waxay khuseysaa xataa haddii aan covid-19 horey ugu qaaday?

Haddii aad mar hore, lix bilood gudahood, aad laheyd infegshan la xaqiijiyey oo covid-19 ah ayaanad u baahneyn inaad jitaabo iska qaado. Haddii aad xanuunsato, si kastaba ha ahaatee guriga joog ilaa intaad ka wada bogsaneyso.

Goorma ayay shaqeynaysaa guriga isku karantiimeynta ee xiriirada qoysku?

Guriga isku karantiimeynta waxa go'aaminaaya dhakhtarka waxaan keliya la isticmaalayaa marka uu kiis la xaqiijiyey qoyska ka jiro.

Xog ku sabsan covid-19

Goorma ayaan xanuunsan karaa?

Waqtiga laga bilaabo marka infegshanka la qaado illaa marka inuu qofku xanuunsado (muddada marka uu qofku xanuunka qaado ilaa inta uu soo shaacbaxaayo) waxay u dhexeysaa 2 ilaa 14 maalmood, waxa badanaa caadi ah 5 maalmood.

Calaamado nooc ee ah ayaa covid-19 u caadi ah?

Qandho, duuf, qufac, neefta oo ku qabata, cune xanuun, madax xanuun, murqo xanuun, dareenka urta iyo dhadhanka oo hoos u dhaca, calool xanuun iyo shuban. Waxay dadka badankoodu yeeshaan xanuun fudud oo leh calaamado khafiif ah, halka dadka qaarkood ay aad ugu xanuunsadaan iyagoo leh dhibaatooyin neefsashada oo ayna u baahan karaan daryeel cisbitaal.

Sidee ayaa fayruska Korona lagu kala qaadaa?

Waxa fayruska Korona lagu kala qaadaa iyadoo uu soo maraayo waxa loo yaqaano infegshanka dhibicda iyo wada xiriirka. Marka uu qofku hindhiso, qufaco ama hadlo ayaa dhibco faafayaa hawada ku sameysmaya. Haddii qofkaas loo dhow yahay ayaa la qaadi karaa. Marka dhibcahu ay ku soo dhacaan oogada/dusha sare ama walax ayaa infegshanku halkaas ka sii gudbi karaa, badanaa isagoo gacmaha soo maraaya. Haddii indhaha ama sanko la taabto iyada oo aan gacmaha la dhaqin ayaa fayrusku jidhka dariiqaas ka soo gali karaa. Sidaas daraadeed waa muhiim in masaafad la isku jirsado oo badanaa gacmaha la dhaqo.